



Somalia

## **FURSADAHA SHAQOYINKA EE DAWLADA GALBEEDKA USTEREELIYA.**

jobs.wa.gov.au waa albaabka lagagali karo wararka ku saabsan fursadaha shaqooyinka dawladeed ee Galbeedka Ustereeliya, taas oo ah shaqogaliyaha ugu weyn ee gobolka.

Qofkastaa wey u furantahay inuu arji u qorto shaqooyinka lagu xayeysiyo bogga [jobs.wa.gov.au] haddii aan lagu sheegin xayeysiika cida gaarka ah ee ay u furan tahay mooyaane. Xulashada shaqooyinka waxaa sal u ah xirfada, aqoonta iyo kartida gaarka ah ee hawsha laqabanayaa u baahan tahay.

Dawlada Galbeedka Ustereeliya waxaay dooneysaa shaqaale ka kooban bulshada si ay waxqabad tayo leh ugu qabato dadka. Sidaa awgeed, dadyawga kakala yimid dhaqanada kala duwan, dadka askooda u dhashey Ustereeliya iyo dadka laxaadka daran ayaa lagu dhiirigelinayaa in ay araaajida u qortaan shaqooyinka.

Wadaniyada Ustereeliya ama daganaasho inuu heysto ayaa loo bahan yahay qofka doonaya in la siiyo shaqooyinka dawlada ee joogtada ah.

Dadka aan dagitaanka heysan ee heysta fiisaha shaqada waxaa loo ogolyahay shaqooyinka mudada xadidan oo kaliya.

## **LOOXA SHAQOYINKA DAWLADA EE GALABEEDKA USTEREELIYA (WA GOVERNMENT JOB BOARD)**

Dariiqado dhawar ah ayaad u baadhi kartaa looxa shaqooyinka dawlada ee Galbeedka Ustereeliya.

### **Siyaabo aad ku baadhikareysid looxa Shaqooyinka**

#### **Baadhitaanka shaqooyinka bannaan oo dhan**

- Dooro shaqo dabadeena riix 'Search' adigoo isticimaalaya maawaska.

#### **Baadhitaanka shaqooyinka aad rabtid oo kaliya**

- Waxaad ku raadinkartaa shaqooyinka nooca ay yihiin, mushaharka inta uu yahay, meesha/gobolka, haya'da, hawsha laqabanayo ama kala qaybintooda.

**Waaxad ogaataa:** si aad u dooratid hal shaqo wax ka badan waxaad hoos u qabataa badhanka ay ku qorantahay *CTRL* adigoo ku dhufanaya mawskaaga, dabadeedna ku dhufo 'Search'.

### **Baadhitaanka shaqooyinka ugu dambeeyey**

- *Ku dhufo halka ay ku qorantahay* 'View Latest Jobs' oo ah dhica bidix ee liiska doorashada.

### **Is qor inaad heshid eemeel lagugu ogeysiinaayo shaqooyinka bannaan**

Waxaad dooran kartaa inaad heshid eemeel lagug ogeysiineyo jagooyinka bannaan ee la xayeesiiyey kuwaas oo ku haboon shaqooyinka aad raadineysid. Ku dhufo meesha ay ku qorantahay 'Email me Jobs' ee dhica bidix ee liiska doorashada, ku qora macluumaadkaaga adigoo raacaya wararka is qorista. Waxaa lagu soo deridoonaa eemeel lagugu siineyo baaswoodh aad ku geli kartid si aad ku sameysid shaqo raadiskaaga.

### **Sameeynta shaqo raadiskaaga**

- *Kudhufo* 'Login', gali eemeelkaaga iyo baaswadhkaaga.
- Dadadeena ku dhufo 'My Details'.
- Dadadeena ku dhufo 'My Search Profile' isticimaal badhanka *CTRL* si aad u doorato hal shaqo wax ka badan ama dooro shaqooyinka oo dhan si aad u heshid eemeel shaqooyinka bannaan oo dhan ee la xayeesiiyey dabadeedna dooro "Yes" ama "No" si laguugu soo diro 'Email me Jobs' dabadeedna ku dhufo 'Save Profile'.

Waad badeli kartaa shaqoraadiskaaga markasta oo aad doonto adigoo dib u galaya looxa shaqooyinka dawlada ee Gobolka Galbeedka Ustereeliya.